

# MADHALAYSNIMO







## MADHALAYSNIMO.

CALI IYO CAASHA AYAA ISGUURSADAY. SANNAD MARKAY ISQABEEN OO AANAY WELI WAXBA ISU DHALIN, AYAA MAALIN CALI KU YIDHI CAASHA, "HORTA MA MADHALAYAAL AYAYNU NAHAY ILEYN DADKII INALA MIDKA AHAA CARUUR AYAY LEEYIHIINE ". "WAA ARRIN ILAAHAY KU XIDHANE MIYEYNU KA HADLI KARNAA ?" AYAY CAASHA TIDHI.

SIDAY CAADADA SOOMAALIDU TAHAY, RAGGU DHAL LA'AANTA WAXAY SAARAAN DUMARKA. HASEYEESHE, WAA ARRIN KHALAD AH.





CALI HOYADII OO KA XUN DHAL LA'AANTA WIILKEEDA HAYSATA, AYAA KU TIDHI WIILKEEDII, "MAXAAD NAAGTAN GURIGA UGU HAYSATAA AAN DHALEYN ? QAYRKA WAXAY LEEYIHIIN CARUUR SOO ADEEGA."

INANKA AABIHII WAXA UU TALO UGU SOO JEEDIYEEY INUU NAAGTA LA GUURSADO. CAASHA ARRINTII AYEY MAQASHAY WAANAY KA CADHOOTAY.






SODOHDII INTAA KUMAY EKEYNE WAXAY U TIMID GABADHII OO AY KU TIDHI, "NAA HORTA MAXAAD WAX U DHALI WEYDEY, MA SIDAASAAD RABTAA INAAD KU JOOGTID GURUGA ?" CAASHA CIIL IYO CADHO AYEY ISLA DUUBTAY.







MAALIN AYEY CAASHA ARAGTAY DUMAR CARUUR GEYNAAYA M.C.H.KA. WAXANA AY WEYDIISAY HAWEEKII, IN HALKAA UU JOOGO TAKHTAR KU SHAQA LEH CUDARADA HAWEENKA. WAXAYNA UGU JAWAABEEN, "HAA". "TOLOW MA U TAGAA", AYEY CAASHA TIDHI. "MAXAA KAA HORJOOGA", AYEY ISKU QANCISAY. WAXAY CAASHA KU GOOSATAY INAY ARAGTO TAKHTARKA SIDII BAYNA U RAACDAY DUMARKII.





CAASHA M.C.H.KA WAXAY KULA KULAN TAY QAALI OO AH TAKHTARADII DUMARKA. WAXAY U SHEEGTAY WEL-  
WELKA IYO DHIBAATADA KA HAYSATAY DHAL LA'AANTA. QAALI MARKII AY WARAYSATAY AYAY WAXAY U SHEEGTAY  
INAY CAAWINI KARTA WAXAYNA LA SOCODSIISAY SIYAABAHA WAX LOOGA QABTO MUSHKILOOYINKAA OO KALE.





1	2	3	4	5	6	7
8	9	10	11	12	13	14
15	16	17	18	19	20	21
22	23	24	25	26	27	28

"WAXA WAX LOOGA QABAN KARAA", AYAY TIDHI TAKHTAR QAALI. "IYAADOO LA SIIYO:

'HOORMOONO' IYO DAAWOYIN KALE OO U KHAAS AH."

"DAAWOYIN BAA LA SIIN KARAA KORDHIYA BACRIMINTA."

"WAXA KALE OO BACRIMINTA SARE U QAADI KARA NUXUR ISU DHEELI TIRAN, SIDA:BAROOTIIN, IYO KAARBOONHAYDAREYDKA, FIITAMIINO IYO DUFAN".

"WAXA KALE OO BACRIMINTA SARE LOOGU QAADI KARAA (AMA LAGU KORDHIN KARAA ILMA QARSASHADA) IYADOO LA URURIYO HEER KULKA, IYO ASTAAMAHA KALE EE WAREEGA CAADADA, MAALIN WALBA OO BISHA KA MID AH ILAA CAADADA LABAAD".

"MAXAA LA EEGAYAA ?" CAASHA AYAA TIDHI. TAKHTAR QAALI AYAA TIDHI,

B. WAQTIGA'UU YIMAADO.

T. INTA UU MAQNAADO.

J. INAAD KU XANUUNSATO IYO IN KALE.





TAKHTAR QAALI WAXAY U SOO QORTAY DAAWOYIN WAXAYNA SOO SIISAY TALOYIN, ISLA MARKAA WAXAY KA CODSATAY INAY U YIMAADAAN IYADA NINKEEDU SI AY ULA TALISO. UGU DAMBAYNTII WAXAY KU GUULAYSTEEN INAY CARUUR YEESHAN.





CALI HOYADIINA WAXAY KU FARAXDAY CARUURTII INANKEEDA.



HADDI AAD DHIBAATO KALA KULANTID  
MADHALAYSNIMADA,

LA XARIIR XARUNTA M.C.H.KA





